



# Child Health Plus

## Ee Milicsiga

### YAA U QALMA?

#### CARRUURTA EE KA:

- Hooseeyo da'da 19
- Dadka dagan Gobolka New York
- Uma qalmo Medicaid
- Aanan ku daboolneyn caymiska kale ee caafimaadka
- Uma qalmo ama kama diiwaangashano caymiska caafimaadka oo illaa barnaamijka faa'idooyinka caafimaadka gobolka (NYSHIP)
- Carruurta waxay u qalmi karaan oo aan laga eegin heerka socdaalka

NY State of Health waxay u hoggaansanta sharciyada xuquuqaha madaniga Federaaliga ee lagu dabi karo iyo sharciyada gobolka, oo wax kuma takooro qaababka isirka, midabka, asalka qaranka, caqiidada/diinta, sinjiga, da'da, heerka guurka/qoyska, diiwaanka xabsiga lagu qaatay, dembi kuhelida falka dambi, aqoonsiga sinjiga, qaabka galmada, sifooyinka u nuglaanshaha hidda sidaha, heerka guurka, gabood falka guriga heerka dhibanaha iyo/ama aargoosiga.

### MAXAA KU DABOOLAN?

- Booqashada wanaagsan ee carruurta
- Baaritaanada jirka
- Tallaalada
- Sheybaarka iyo adeegyada sawirida
- Adeegyada degdega
- Daawooyinka dhaqtarka qoray
- Daawooyinka aanan dhaqtarka qorin, haddii uu ku amro dhaqtarka
- Daryeelka bukaanka jifka isbitaalka
- Adeegyada bukaan socodka daaweynta muddada gaaban (daaweynta kiimikada, kelyo sifeynta)
- Caafimaadka maskaxda bukaan jifka iyo bukaan socodka iyo nidaam darada xadgudubka maandooriyaha
- Adeegyada Ilkaha iyo Aragtida
- Adeegyada Hadalka iyo Maqalka
- Qalabka Caafimaadka Raago
- Daryeelka guriga

#### HA NOOLA HIRIIR:

[nystateofhealth.ny.gov](http://nystateofhealth.ny.gov) | 1-855-355-5777 or TTY 1-800-662-1220

# IMISA AYUU JOOGAA QORSHAHA CHILD HEALTH PLUS?

**LACAGTA CAYMISKA BIL-LAHA:** Qiimaha bilaha ah waxa uu ku xidhan yahay dakhliga bilaha ah iyo cabbirka qoyska. Ma jirto lacag caymiska bilaha ah ee qoysaska dakhliyada hoose leh. Qoysaska leh dakhliyada sare waxay bixiyaan lacagta caymiska bilaha ah, isa waafaqsan jaantuuska hoose. Qoysaska balaaran, qidmada bil-laha waxaa la geliyaa sadex carruur. Qoysaska daqliga ka sareeyo heerka daboolida kaalmada waxay bixinayaa lacag bixinta caymiska buuxo oo iska badelyso ka qeybqaadashada qorshaha caafimaadka.

**QARASHKA LA WADAAGAYO:** Child Health Plus ma lahan ka jarida sannadlaha iyo ma jiraan lacag bixinta caymiska.

Ugu badnaan Daqliga Sannadlaha oo Cabirka Qoyska ah				Tabarucida Qoyska Bil-laha oo Canugliiba (tirada ugu badan ee carruurta aad ka bixineysid waa 3)
1	2	3	4	
ka yar \$20,608	ka yar \$27,872	ka yar \$35,136	ka yar \$42,400	\$0
\$28,594	\$38,673	\$48,752	\$58,830	\$9 (ugu badnaan \$27)
\$32,200	\$43,550	\$54,900	\$66,250	\$15 (ugu badnaan \$45)
\$38,640	\$52,260	\$65,880	\$79,500	\$30 (ugu badnaan \$90)
\$45,080	\$60,970	\$76,860	\$92,750	\$45 (ugu badnaan \$90)
\$51,520	\$69,680	\$87,840	\$106,000	\$60 (ugu badnaan \$180)
ka badan \$51,520	ka badan \$69,680	ka badan \$87,840	ka badan \$106,000	Lacag bixinta caymiska buuxo, waxay ku kala duwantahay qorshaha caafimaadka (ma jirto tirada ugu badan oo loo cayimay qoyska)

\*Ku salaysan Heerarka Fakhriya Federaalka 2021 (FPL). Heerarka Dakhliga waa la habbayn karaa sanad kasta iyaddoo ku salaysan isbeddelada FPL.